

## **Wakhtiga la sugo Baaritaanka magangalyo dalbashada.**

Wakhtiyadii ugu dambeeyay waxaa wadanka Iswiidhan soo galay dad badan oo magangalyo dalab ah. Taasina waxeey sababtay in uu dheeraado wakhtiga baaritaanka magangalyo dalbashada.

Markaad isku diiwaan galisid inaad tahay qof magangalyo dalab ah waxaa laguugu yeerayaa kulanka baaritaanka magangalyada dalbashada. Kulankaas waxaa wax lagaa weydiinayaa sababta aad magangalyo u dalbaneysid iyo waxyaabii aad horay usoo martay. Maadaama eey dad badan magangalyo dalab yihiin wakhti dheer ayeey qaadaneysoo inta aanan lagu qaban wakhti kulan. Hey'adda laanta socdaalka wax go'aan ah ma gaareyso inta ka horreeysa kulanka baaritaanka magangalyo dalbashada.

Hey'adda laanta socdaalka waxeey shaqaaleysiisay dad badan, waxeey kaloo furtay xarumo cusub si loosoo gaabiyo wakhtiga sugitaanka. Kala qeybinta wakhtiyada baaritaanka si sax ah uma dhacaayo markasta maadaama la rabo in si fiican howlaha baaritaanka loo hirgalyo. Tusaale ahaan waxaa dhici karta in xarumaha qaarkood ee goballada qaar ku yaal ineey wakhtiyo ka firaqoobaan taasina eey kento in dad adiga kaa dambeeyay hortaa loogu yeero kulanka baaritaanka magangalyo dalbashada. Wakhtiyada dib u dhigi kara waxaa ka mid ah in wakhtiyada eey yihiin kuwo loogu tala galay qoysas ama kuwo dadka kaligoodka ah loogu tala galay. Waxaan kaa codsaneynaa inaad fahantid xaaladda adag ee aan hadda ku sugannahay.

Haddii aadan helin wax wakhti ah illaa 1 maarso sanadka 2016 waan kula soo xiriiri doonnaa waxaana kuu sheegi doonnaa halka uu boroseeskaada maraayo.

Waa fahmi karnaa ineey aad u dhib badantahay in lasugo go'aanka lagaa gaaray laakiin annaga waxaan markasta sameeyneynaa inta karaankayaga ah si aan usoo dadajinno go'aan ka gaaridda qadiyadda qof kasta anagoo si caddaalad ah u fiirineyna.